Shuban iyo matag caruurta dhigata xanaanada caruurta

Warbixin ku socota qofka leh caruur dhigata xanaanada caruurta

Calool xanuun wata shuban iyo matag waa u caadi caruurta dhigata dugsiga xanaanadda. Isqaadssintu si fudud ayaay ku faafaan taasi oo noqon karta in dadka xidhiidh dhaw yeesha in ay is qaadsiiyaan oo bukoodaan. Sidaas awgeed caruurta calooshu xanuunaysa waa inaanay imanin xanaanada caruurta ilaa inta ay ka bogsanayan ee aanay lahayn matag ama lahayn shuban ugu yaraan 48 sacadood.

Calool xanuunku waxa uu ku iman kara si dhakhso ah waxaanu qofka ka taga dhawr maalmood gudahood. Hadii caruuro dhowr ahi ay markaliya wada xanuusadan ama mudo wax yari u dhaxayso oo yeeshaan calaamado isku mida waxa mihiim ah in la raadiyo hadii ay jirto meel ay jirada ka wada qaadeen si looga hor tago si aanay cid kale u qaadin.

Sabaabta

Fayrusku waa sabaabta inta badan keenta calool xanuunka ku dhaca caruuta dhigata dugsiga xanaanada caruurta. Infakshanka/caabuqa calicivirus mar marka qaarkoodna loogu yeedho jirada ”mataga jiilaalka/vinterkräksjuka” iyadoo xitaa la qaadi karo jirada sanadka oo dhan. Infakshanka fayrusku waa mid si fudud la isku qaadsiin karo oo ku dhici kara dhawr qof mudo yar oo gaaban gudahood.

Sababaha keena shubanka waa bakteeriya ay ugu badan tahay salmonella-,EHEC iyo bakteeriyada kale ee ku dhacda xiidmaha caloosha. Infakshan ka caynkana ee ku dhaca xiidmaha caloosha waxa uu inta badan keena qandho laakiin mar mar ayuu keena matag. Hadii uu yahay shuban uu keenay bakteeriya waxa jiri kara khatar ah marka loo eego calool xanuunka uu fayrusku keeno.

Shuban mudo dheer socda oo haya caruur badan waxa uu noqon karaan kudul noolayaasha xubnaha caloosha gala/tarmparasiter (tusaale ahaan sida infakshanka ku dhaca xiid maha caloosha/giardia) ayaa sabab u noqon kara.

Smittskydd Västra Götaland

Södra Älvsborgs Sjukhus
501 82 Borås
Tfn 010 – 441 24 31
Fax 033 – 10 04 92

Kaserntorget 11 B
411 18 Göteborg
Tfn 010 – 441 24 00
Fax 031 – 13 37 95

Skaraborgs Sjukhus
541 85 Skövde
Tfn 010 – 441 24 27
Fax 0500 – 43 24 99

Uddevalla Sjukhus
451 80 Uddevalla
Tfn 010 – 441 24 23
Fax 0522 – 131 82

E-post
smittskydd@vgregion.se

Hemsida
www.vgregion.se/smittskydd

Dariiqyada lagu kala qaado

Kala qaadidu waxay ku dhacdaa in maadadaha wax laga qaadayo ee saxarada iyo matagu ay afka kasoo galan. Taasina waxay ku dhici karta si toosa iyada oo ay ka imanayso dadka jiran ama meelo aan nadiif ahayn (tusaale ahaan dhulka, tuwaalka/shukumaan, ciyaaraha ciyaalku ku ciyaaran, meelaha la qabsaddo iyo waxyaalaha kale). Gacmaha aan nadiifta ahyn ayaa sabab u ah in xanuunku u fido. Waxa kale ee laga qaadi kara cuntadda ama cabitaanka si khaldan loo maamulo. Calool xanuunka waxa kale ee lagu qaadi kara aerosol(dhibco yar yar oo hawada la socda) kuwaas oo faafa marka la matago. Is qaadsiintu waxa ay ku hadhi karta cuntada aan la diirinin ama waxyaalaha wasakhaysan wakhti ayaamo badan ah.

Wakhtiga qofka cudurku ku dhaco ilaa inta uu soo shaac baxayo

Calool xanuunka uu fayrusku sabab u yahay waxa uu inta badan qaata 1-3 cisho laga bilaabo marka uu qofku qaado ilaa inta uu qofku xanuusanayo. Sabaabo kale hadii ay jiraan mudo inta ka badan ayaay qaadan karta.

Talada xaga nadaafada

- Ku dadaal nadaafada xaga gacmaha
- Gacmaha ku maydh saabuun iyo biyo marka aad musqusha kasoo baxdo, marka aad xafaayada badasho iyo ka hor wakhtiyada cuntada la cuno.
- Hadii aad jiran tahay rashiinka diyaarintiisa iska ilaali.
- Musqusha intaanad biyaha ku sii daynin daboolka dul dhig.
- Xafayadaha ku xidh bac gunud oo tuur.
- Nadiifi meesha wax lagu maydho/dhaqo, qasabadaha, meesha lagu fadhiisto musqusha iyo meesha la riixo marka biyaha lagu sii daynayo musqusha.

Daawaynta

Waa mihiim in caruurta shubmaysa ee saxardoodu biyo oo kale tahay ama leh matag badan in la siiyo biyo ku filan. Infakshanada intooda badani iyaga ayaa iska bogsada lakiin qaarkood ayaa u baahan in la daweeyo.

Cunugu ma guriga ayuu joogaya?

Haa. Caruuta calooshu xanuunayso (shuban iyo matag) waa inaanay joogin xanaanada caruurta. Shuban waxa loola jeeda sadex ama inka badan oo ay leeyihiin saxaro jilicsan. Cunugu wuxu ku noqonaya xanaanada caruurta marka uu cuntada u cuno si caadiya ee aanu lahayn matag ama shuban ugu yaraan 48 sacadood. Mudooyinka u jiro calool xanuunku waxa lagu joojin kara inuu xanuunku ku fido xanaanoyinka caruurta in caruurta jiran walaalahood ay guriga jogaan.

Shuban ku yimaada kadib safar wadanka dibadiisa

Shuban ama dhibaato kale oo xaga caloosha ah oo kugu timid kadib safar wadanka dibadiisa. La xidhiidh goobaha daryeelka bukaanka si badhitaan loogu sameeyo inta aanu cunugu tagin xanaanada. Xitaa dhacdooyinkan waa

inuu cunugu aanu matagin ama aanu ahayn shuban ugu yaraan 48 sacadood intaanu dib ugu soo noqon xanaanada caruurta.

Wargalin

Si dhakhso ah usoo wargalin xanaanda marku ilmuhu xanuusado waxa ay samaynaysa in faafida xanuunku u yaraado iyo in laga hortago dilaacida cudurka.

Wixii warbixina ee intaa dhaafsiisan ka akhri 1177 vårdguiden https://www.1177.se/Vastra-Gotaland/Fakta-och-rad/Sjukdomar/Magsjuka---diarre-och-krakningar/

Innehållsansvarig	Leif Dotevall, Bitr. smittskyddsläkare
Godkänt av	Thomas Wahlberg, Verksamhetschef och smittskyddsläkare Datum